

# Dulmarka Organizational License Project (Mashruuca Liisanka Ururada) DCYF

## Taariikhda

Intii lagu jiray xanuunka COVID-19, ururada daryeela caruurta ee leh dhowr meelood waxay ka waajaheen caqabado ku darista meelo cusub si ay u buuxiyaan baahida bulshada ee daryeel cunug oo liisan haysta. Iyadoo laga jawaabayo, Xeerka Gobolaha ee Senate Bill 5092 Sec. 229 (19), kasoo uga baahan gobolka Washington ee Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarada iyo Qoysaska, DCYF) inay dejiyaan mashruuca bilow ah si loo go'aamiyo qeyb daryeel liisan leh oo lagu guulaysan karo barnaamijyada dhowr ka meelood ee hal xaqle ama hal haayad.

## Ujeedada iyo Baaxada

Ujeedada Organizational License Project (Mashruuca Liisanka Ururada) waa in la go'aamiyo qeyb urur liisan haysta oo lagu guulaysan karo barnaamijyada daryeelka cunuga ee hal xaqle ama hal haayad. Kani waa mashruuc saddex sano ah, iyadoo tijaabadu dhacayso inta u dhaxaysa Julaay 1, 2022, iyo Juun 30, 2023. DCYF waxay siinaysaa wado kale adeeg bixiyayaasha iyo daneeyayaashu inay ku lug-yeeshaan haddii aanay ahayn ka qeybgalayaal tijaabo ah. Tani waxa ku jiri doona xaflado ka qeybgal bulsho si loo bixiyo warbixino mashruuca loona dhageysto waxa adeeg bixiyaha bulshadu galiyey. Adeeg bixiyayaasha iyo daneeyayaashu waxay sidoo kale fursad u heli karaan inay kaga qeybgalaan tababarada mashruuca si loo sameeyo talobixin nashaqada bilowga ah ama koox latalin ah, oo bixisa talooyin lagu gaadho go'aamo kama danbeysa oo ganacsi. Xubnaha DCYF Waaxda Liisanka ee Racial Equity and Social Justice (Sinaanta Jinsiga iyo Kooxda Latalinya Cadaalada) Bulshadu (RESJ) waxay ka qeybgalayaan mashruuca, oo qalabka sinaanta jinsiga ayaa lagu isticmaalay sameynta tijaabada iyo go'aan qaadashada dhamaan mashruuca.



## Tijaabada

- Tijaabadu waxay bixin doontaa nidaam toosan barnaamijyo dhowr inay yeeshaan meel cusub oo liisan leh waxayna ku dari doonaan nidaamyada si loo kordhiyo waxtarka nidaamyada kormeerka socda.
- Ka qeybgalayaasha tijaabada waa inay ku jiraan ugu yaraan hal wakaalad oo dawlada ah, hal urur oo samo-fal ah, iyo hal ganacsi oo gaar loo leeyahay.
- DCYF waxay ka taxadiri doontaa siinta fursada tijaabada xarumaha siiya daryeelka caruurta la hilmaamay iyo bulshooyinka la takoor.
- DCYF waxay abuurdo doontaa shuruud lagu qaadanayaa oo lagu baadhayo ka qeybqaatayaasha daneynaya tijaabada waxayna ka qaadan doontaa kaqeybqaatayaasha goobo isku dhafan oo miyi, magaalo, iyo duleedka magaalo ah.

## Waafaqsanaanta Ahmiyadaha Wakaalada

- Horumari tayada iyo qorshaha dhaqangalinta
- Horumari tayada iyo helitaanka adeeg bixiyayaasha.
- Horumari tayada iyo helitaanka cunuga ee daryeelka wadankoo dhan.

Macluumaad dheeriya, fadlan iimaylu dir:  
[michelle.balcom@dcyf.wa.gov](mailto:michelle.balcom@dcyf.wa.gov)

*Haddii aad jeclaan lahayd nuqulada dukumentigan oo qaab kale ama luqad kale ah, fadlan la xirii DCYF Constituent Relations (Xiriirka Deegaanka) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, [ConstRelations@dcyf.wa.gov](mailto:ConstRelations@dcyf.wa.gov)).*

DCYF PUBLICATION LIC\_0033 SM (10-2021) Somali



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**